**Xeerka L. 28 rep**

**Nidaamka habraaca qaadista garsoorka darajada koobaad.**

## MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

## MAAMULAHA

Marka uu arkay xeerka 4 Nofember 1951, lamba. 1301 ee lagu ansixixay iyo lagu fulinayo Heshiska Ilaalinta Dhulka Soomaaliya;

Marka uu arkay xeerka nidanka garsoorka ee lagu meelmariyay lamba. 5 rep, taariikhda 2 Febraayo 1956;

Marka uu garowsaday habbboonaanta in la soo saaro xeer nidaaminaya ee ku saabsan habraacaaca garsoorka darajada koobaad;

Marka uu dhagaystay talada Golaha Maamulka;

Iyo soo jeedinta Agaasimaha Xeerarka AA-GG;

## WUXUU XEER KU SOO SAARAYAA

### Qod. 1

Waxaa la meelmariyay nidaamka habraaca midaysan ee la xariira qaadista garsoorka darajada koobbad oo ka kooban 11 qod.

### Qod. 2

Xeerkanu wuxuu dhaqangalaya maalinta 60aad ee ka soo wareegta marka lagu baahiyo Fafinta Rasmiga

Muqdisho, 24 Febraayo 1966.

Maamulaha

**Anzilotti**

Waan arkay lana diiwangeliya – Diw. lamba. 15, bogga lamba. 40

Muqdisho, 23 Maarso 1956.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**

## NIDAAMKA HABRAACA QAADISTA GARSOORKA DARAJADA KOOBAAD

### Qod. 1
### Qaabka iyo Nuxurka Codsiga

Codsiga cabasha lagu soo hagajinayo garsooraha gobolka waan in uu ku jiraa:

1) aqoosiga dacwoodaha iyo goobta uu degganyahay;
2) aqoonsiga dacweysanaha, deegaankiisa iyo meesha isagu ama qofka wakiilkiisa aha ama caawiyaha uu degganyahay.

   Haddii uu ku saabsanyahay shaqsiyad qaanuuneed ama urur, waxaa loo bahanyahay tilmaanta magaca loogu yeero ama shirkadda, iyado la tilmaamayo hay’adda ama xafiiska garsoorka uga wakiilka ah;

3) la qeexo mowduuca dacwadda waxa uu yahay;
4) la soo bandhigo dhacdooyinka iyo xuquuqda suurtagalka ah;
5) tilmaamidda muujinada uu dacwooduhu ku doodayo;
6) tilmaamidda wakiilka gaarka iyo wakaaladdaa haddii dacwooduhu aanu dacwadda si shaqsiya uga soo qaybgalayn. Haddii cabashada ay ka maqantahay saxiixa, waan in la sheegaa sababa awood darri ama wax ka reebay dacwoodaha.

**Qod. 2**
**Muddaynta Garmaqalka, ka soo Qaybgalka iyo Wargalinta**

Marka uu hubiyo saxnanta cabashada, maankana ku haya goobta ay wargalinta ka dhacayso, garsooruhu wuxxu xeer ku muddanayaa garmaqalka in dhinaycadu ka soo qaybgalaan si loo gaaro iskuday heshiisiin.

Kaalinta ayaa u xilsaaran gaarsiinta cabashada iyo dekereetda iyada iyado kharaska uu qabo dacwoodaha si loo gaarsiiyo dacweysanaha cabashada iyo dekereetda, sidoo kale wuxuu ogaysiinayaa dacwoodaha qaraarka ka soo qaybgalka.

**Qod. 3**
**Diiwaangelinta Dacwadda**

Dacwadda waxaa la diiwaangelinayaa marka cabashada la keeno

**Qod. 4**
**Ka soo Qaybgalka Dhinacayada**

Dhinacyadu waa in ay ka soo qaybgalaan garmaqlka ugu horreeya. Haddii ay imaan waayaan, oo aanay jirin sabab ka reebaysa imaashaha, Garsooruhu qofka aan imaan wuxuu ku xukumi karaa ganaax lacageed ee aan k badnayn So. 50, isagoo u qabanaya muddo cusub oo ay ka soo qaygalaan, wuxuu kaloo amri karaa in ciidanka nabadgalyada in ay khasab ku keenaan.

**Qod. 5**
**Iskudayga Heshiisinta**

Marka dhinacyada ay wada yimaadaan, garsooruhu wuxuu bilaabayaa in uu wax ka weydiiyo xaaladaha khilafkooda wuxuuna isku dayayaa in ay arrinta ka heshiiyaan.

**Qod. 6**
**Maxdarka Heshiisiinta**

Haddii dhinacyada ay arrinta heshiis ka gaaraan, waxaa laga samaynayaa maxdar gaara, oo xitaa uu garsooruhu wax saxiixo, kaaso leh awood xukun fulineed.

**Qod. 7**
**Go’aanka Deg-degga**

Haddii heshiis la gaari waayo sababa la xariira in dhinac ka mida si aan cudur daar lahayn uu u diido, dacwddana aanay u baahnayn in la dhagaysto, Garsooruhu wuxuu si deg-degga ku dhawaqayaa xukun isagoo dhinacayada u akhirinaya go’aanka, isla markaasna lagu qorayo maxdarka garmaqalka.

Akhrinta go’aanka waxay la mid tahay gaarsiinta xukunka.

**Qod. 8**
**Tallaabooyinka Dhagaysiga Dacwadda**

Haddii uu fashilmo iskudayga heshiinta, Garsouhu wuxuu ku dhaqaaqayaa fursadaha talaboyinka dacwadda lagu dhagaysanayo.

**Qod. 9**
**Ka soo Qaybgal la'aanta labada Dhinac**

Haddiiba labada dhinan midna aanu ka soo qaybgalin garmaqalka ugu horeeya oo arrimaha hordhaca ay ka muuqato in si saxa loo gaarsiiyay dacwoodaha dekeertada wargalinta muddaynta, Garsooruhu wuxuu amarayaa in dacwadda laga saaro buugga isago caddaynayo in dacwaddii ay baaaba'day.

**Qod. 10**
**Ka soo Qaybgal la'aanta Dacwoodaha**

Garsooraha, haddii dacwoodaha si saxa loo gaarsiiyay oo aanu ka soo qaybgalin garmaqalka ugu horreeya, wuxuu ku dhawaaqyaa in dacwadddii ay baaba'day, haddiise dacwysanuhu uu codsaday in dacwadda la dhagaysto, garsooruhu wuxuu amarayaa in qasab lagu keeno dacwoodaha. Haddii kaasu caddaeeyo sababo maangala oo ka reebayay ama la rumaysan karo in heshiinta ay tahay waxaan meesha ku jirin, garsooruhuu wuxuu caddaynayaa maqnaanshaha dacwoodaha aan imaan, isgoo ku tallaabsanaya in dacwadda la dhagaysto haddii aan go'aan kale laga gaarin dacwadda.

**Qod. 11**
**Ka soo Qaybgal la'aanta Dacweysnaha**

Garsooraha, haddii garmaqalka ugu horreeya uu dacweysanuhu ka soo qaybgali waayo, wuxuu amarayaa in qasab laku keeno. Haddii kaasu caddaeeyo sababo maangala oo ka reebayay ama la rumaysan karo in heshiinta ay tahay waxaan meesha ku jirin, garsooruhuu wuxuu caddaynayaa maqnaanshaha dacweysanaha aan imaan wuxuuna soo saarayaa qaraarka ku qoran faqradda labaad ee kore.

Maamulaha
**Anzilotti**